Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo geliyay https://go.usa.gov/xtBQC.

Sibtambar 6, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka
Ujeedada: Qadada iyo taxanaha waxbarasho ee Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka

Bisha Wacyi gelinta Shaqaaleysiinta Naafada ee Qaranka (NDEAM) waxay dhacaysaa Oktoobar. Dhacdooyin taxane ah ayaa la qaban doonaan, oo ay ku jiraan qado toddobaadle ah iyo taxanaha waxbarasho.

Hal hayska NDEAM 2022 waa Naafanimada “Disability: Oo ah qayb ka mid ah Isbarbardhiga Sinnaanta.” Tani waxay aqoonsataa doorka muhiimka ee dadka qaba naafanimadu ku leeyihiin ka dhigida shaqaalaha qaranka kuwo kala duwan oo loo wada dhan yahay.

Qadada iyo dhacdooyinka waxbarasho waa maalmaha Talaadada, laga bilaabo Oktoobar 4 duhurnimada. Dhammaan afarta dhacdo waxaa lagu qabtaa internet-ka iyada oo la adeegsanayo Zoom marka laga reebo dhacdada Oktoobar 4, taasi oo ah mid isku dhafan. Hore isku sii diiwaangeli si aad uga qayb gasho mid ka mid ah kulamada Is diiwaangelinta ka dib, waxaad heli doonaa email xaqiijin ah oo wadata macluumaad ku saabsan sida loo galo dhacdooyinka.

Waxaa jir qadada iyo dhacdooyinka waxbarasho ee NDEAM:

Oktoobar 4 – U dabaaldega Horyaalada Shaqada (dhacdo isku dhafan)
Ku soo biir Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka iyo Barmaamijka Employment First ee Bartamaha Oregon si loogu dabaaldego guulaha shaqo ee gobolka. Dabaaldega waxaa ka mid noqon doona kulanka Christian Brigham, oo ka shaqeyn jiray goobta shaqada ee naafada

wuxuuna hadda ka shaqeeyaa Comfort Suites oo ku taala Redmond, waxaana soo raaci doona bandhigyo abaal-marineed. Qaybta shakhsi ahaaneed ee dhacdadani waxay bilaabmaysaa duhurnimada iyada oo ka dhacaysa Madras Performing Arts Center. Cunto ayaa la bixinayaa iyada oo miisaska ilahana ‘resource tables’ la helayo. Fadlan kaga soo jawaab dhacdada shakhsi ahaaneed muddo ku beegan Sibtambar 27. Qaybta dhanka internet-ku waxay bilaabmaysaa 12:30.

Oktoobar 11 – Sii waditaanka in Kor loo socdo
Kulankani waxaa ku jiri doona sheekooyinka dadka hore u sii waday safarkoodii shaqo ka dib markii ay bilaabeen booskoodii u horreeyay. Sheekooyin waxaa sheegi doona dadka laftooda, iyo sidoo kale qaar ka mid ah dadkii wax bixiyay intii ay wax socdeen.

Oktoobar 18 – Kala wareega Waqtigii tegay, Ka la joogo iyo Mustaqbalka
Fadlan nagu soo biir iyada oo saddex qof oo dhallinyaro ahi ay dadka la wadaagayaan safarkooda. Waxay dadka la wadaagi doonaan hadafkooda, riyooyinkooda iyo waayo-aragnimadooda marka la eego shaqada. Mid kasta oo ka mid ahi wuxuu joogaa heer kala duwan safarkooda.

Oktoobar 25 – Joogteynta Taageerada Inta La shaqeynayo
Mid ka mid ah caqabadaha la taaban karo ee ku aadan shaqadu wuxuu noqon karaa hubaal la’aanta ku xeeran sida faa’iidooyinku u saameyn doonaan dakhliga laga helo shaqada. Kulanku wuxuu isla eegi doonaa qaar ka mid ah khuraafaadka iyo macluumaadka qaldan ee ku saabsan sida shaqadu u saameyso faa’iidooyinka.

Waxaa jir laba dhacdo oo dheeraad ah oo dhacaya Oktoobar. Kooxda Mid-Columbia Employment First ayaa marti gelinaysa dhacdada Dancing Through the Decades**Oktoobar 8**. Waxaa lagu qaban doonaa Dalles Civic Auditorium laga bilaabo 6:30–9:30 habeenimo. Dadka da’doodu tahay 16 jir iyo ka sarreeya ayaa la soo dhaweynayaa in ay ka soo qayb galaan, waxaana jira $10 oo ah deeq la soo jeediyay. Dhacdada Abaalmarinta Aqoonsiga Employment First ee sanadkii 5-aad ayaa la qaban doonaa 4 galabnimo iyada oo dhacaysa **Oktoobar 13**. Uga soo jawaab si shakhsi ahaaneed ama qaybta internet-ka ee dhacdada midkood. Tani waxaa marti geliya Employment First Network ee Degaanka Marion, kooxda Employment First ee Degaanka Polk iyo Resource Connections of Oregon.

Qadada iyo taxanaha waxbarasho ee NDEAM waxaa marti geliya Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka, Tababarka Dhaqancelinta, Guddiga Oregon ee loogu talagalay Qof aan indho qabin iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon.

Kulamadani waxaa heli kara dadka naafada ah. Luqadda Calaamadaha ee Maraykanka iyo turjumaada Isbaanishka labadoodaba ayaa laga bixin doonaa. Hadalka qoraalka ah 'captioning' oo toos ah ayaa sidoo kale la heli doonaa. Su'aalaha ku saabsan helitaanka, ama codsiga in wax la sii qorsheeyo oo ay ku jirto turjumaada luqadaha, fadlan la xiriir Employment.First@odhsoha.oregon.gov. Codsiyada waa in la sameeyaa ugu yaraan 48 saacadood ka hor dhacdooyinka.

Waxaa ku lifaaqan waa warqad xayaysiis ah 'flyer' oo loogu talagalay dhacdada oo aan rajeynayno in aad si ballaaran wax ula wadaagi doonto. Waxaa sidoo kale jiri doona qoraalo la wadaagi karo oo la soo geliyo bogga Employment First Facebook.

Waad ku mahadsan tahay shaqadaada iyo taageerida dadka reer Oregon ee qaba naafanimada maskaxda ama korriinka.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena .

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.